# Soo koobida Deeqaha Sinnaanta Carruurnimada Hore ee 2022

## Xaqiiqooyinka Degdega ah ee Wareega 1aad

- Codsiga Deeqda Sinaanta Carruurnimada Hore waxa uu furmay Juun 28, 2022 waxana la xiray Sebtembar 16, 2022.
- Codsiga deeqda waxaa la abuuray iyadoo lala kaashanayo kooxaha naqshadeynta oo ka kooban bixiyeyaasha iyago laisticmaalaya Naqshad khas u ah.
- Miisaaniyada DCYF ee wareega 1aad waxay ahayd $1.7 milyan. 2,370 codsi ayaa la helay iyagoo codsanaya in ka badan $100 milyan.
- DCYF waxay ku turjuntay codsiga iyo agabka 6 luqadood: Carabi, Shiine-Mandarin, Ingiriisi, Ruush, Soomaali, iyo Isbaanish.
- DCYF waxay ku samaysay hubinta tayada dhammaan codsiyada. DCYF waxay meesha ka saartay codsiyo sababahan soo socda awgood: aan u qalmin, lacagihii loo codsaday ujeedooyinka la diiday, codsiyada aan dhamaystirnayn, iyo codsiyada maalgelinta ee ka baxsan xadka la ogol yahay.
- DCYF ayaa markaa u kala hormarisay arjiyada iyadoo loo eegayo qodobbada kala hormarinta ee la sameeyay iyadoo lala kaashanayo bixiyeyaasha.
- Guddi dib u eegis bulshadeed ayaa dib u eegis ku sameeyay 65ka mashruuc ee ugu mudnaa. DCYF waxay ay isticmaashay buundooyinkooda si ay u doortaan codsiyada si ay u maalgeliyaan.
- Abaalmarinta wareega 1aad waxay maalgelin doontaa 34 codsi, oo wadartoodu dhan tahay $1.7 milyan: 22 ka socda Guryaha Xannaanada Carruurta Qoyska, 5 ka socota Xarumaha Xannaanada Carruurta, 2 ka socota Goobaha ECEAP-Kaliya, 3 ka socota Kooxaha Ciyaarta iyo Wax-barashada, iyo 2 ka socda Qoyska, Saaxiibka, iyo daryeelayaasha Deriska.

## Hordhac

Bayaanka ujeeddada DCYF ee Deeqaha Sinaanta Carruurnimada Hore waa sida soo socota: Si loo jiheeyo maalgelinta daryeelka hore iyo beesha waxbarashada iyo barnaamijyada taageerada waalidka, iyadoo mudnaanta la siinayo bixiyeyaasha BIPOC iyo bixiyeyaasha u adeegaya carruurta BIPOC, si loo horumariyo oo loo dhiirigaliyo dhaqamada kor u qaadaya isdhexgalka iyo Tacliinta dhaqan ahaan ka jawaabaysa, deegaanka, iyo xoojinta helitaanka luqadda.

DCYF waxa ay furtay arjiga Deeqda Sinaanta Carruurnimada Hore Juun 28, 2022. Codsigu waxa uu bixiyayaasha waydiiyey carruurta, qoysaska, iyo shaqaalaha ku lugta leh barnaamijyadooda. Waxay kaloo waydiisay bixiyeyaasha inay sharaxaan sida ay u isticmaali doonaan deeqda si ay ugu daraan dhaqamo loo dhan yahay, dhaqamada iyo afafka taageera ama khuseeya, ama labadaba qaabaynta barnaamijkooda waxbarashada hore, bixinta, waxbarashada, tababarka, iyo/ama qiimaynta.

Codsiga waxaa markii hore loo qorsheeyay inuu xidho Ogosto 16, 2022. Kadib markii ay heleen jawaab celin bixiyayaasha, DCYF waxay bedeshay shuruudaha u-qalmitaanka si goobaha ECEAP ay si gaar ah u codsadaan. Si loo oggolaado wakhti dheeraad ah goob kasta oo xiisaynaya inay codsadaan, taariikhda xidhitaanka ayaa la kordhiyay ilaa Sebtembar 16, 2022.

Muddadii codsiga, DCYF waxa ay heshay 2,370 codsi oo codsanaya in ka badan $107 milyan, oo ka badan $1.7 milyanka la heli karo.

## Kala saarida Codsiyada

Codsiyada Sinaanta Carruurnimada Hore waxay soo mareen tillaabooyin badan oo dib u eegis ah. Marka hore, codsiyada waxaa lagu eegay u qalmida iyo dhamaystirka, ka dib waxaa la kala horraysiiyay iyadoo lagu salaynayo qodobada hoos ku xusan, iydo kuwa soo haray la horgeeyay guddi dib u eegis ah si ay darajo u siiyaan.

### Baaritaanka codsiyada

DCYF waxay meesha ka saartay codsiyada aan dhamaystirnayn. Codsiyada ka yimid bixiyeyaasha aan buuxin shuruudaha u-qalmitaanka, ama kuwa codsaday dhaqaale ujeedooyin la diiday, ayaa sidoo kale meesha laga saaray.

### Kala hormarinta

Kadib markii la baadhay codsiyada u-qalmitaanka iyo dhamaystirka, DCYF waxa ay mudnaan siisay codsiyada iyadoo loo eegayo sifooyinka gaarka ah ee shatiga/milkiilaha, shaqaalaha, barnaamijka, iyo caruurta iyo qoysaska ay u adeegto xarunta codsigu.

Ka hor inta aan la furin deeqda, DCYF waxay la shaqeysay bixiyeyaasha si ay u abuurto liiska soo socda ee dadka mudnaanta leh ee deeqda:

- Xarumaha u adeega Caruurta ay boqolkiba inta badan ka soo jeedan bulshooyinka BIPOC.

- Xarumaha u adeega Caruurta ay inta badan boqolkiba qaatan kaalmada gobolka.
- Xarumaha u adeega carruurta ay haysato guri la'aantu ama aan haysan hoy.
- Xarumaha u adeega carruurta ku jirta daryeelka ka baxsan guriga sababtoo ah ku lug lahaanshaha daryeelka ilmaha ee Gobolka.
- Xarumaha u adeega carruurta looga hadlo luqad aan Ingiriisiga ahayn gurigooda.
- Xarumaha leh shatiga BIPOC ama milkiilaha barnaamijkiisa shatiga laga dhaafay.
- Xarumaha leh shaqaale BIPOC ah.
- Xarumaha ku isticmaala luqad aan Ingiriisi ahayn Xarumahooda daryeelka.
- Xarumaha bixiya daryeelka saacadaha aan caadiga ahayn, ama daryeelka 24-saac.

65 codsi oo haysta buundooyinka mudnaan sare leh marka loo eego nooca xaruntooda ayaa loo tixgaliyey inay yihiin kuwa u dambeeya.

### Dib u eegida Gudiga

DCYF waxay soo ururisay talooyinka dib u eegista guddiga la-talinta ee daneeyayaasha dibadda. DCYF ayaa markaa kulmisay guddi dib u eegis bulshadeed si ay u qiimeeyaan codsiyada u dambeeya. Guddiga dib u eegista ayaa ka koobnaa:

- Bixiyeyaasha
- U-doodayaasha Kobcinta Waxbarashada
- U doodayaasha ka socda Child Care Aware of Washington
- Shaqaalaha Helitaanka Luuqadda ee DCYF
- Shaqaalaha DCYF ECEAP

Guddidu waxay akhriyaan soo koobidda codsiyada u dambeeya, iyada oo dhammaan macluumaadka aqoonsiga laga saaray, waxayna mid walba ka dhigeen 1-5. DCYF waxay celcelis ahaan ku celcelisay buundooyinka doodaha si ay u sameeyaan darajada ugu dambeysa.

## Go'aamada Maalgelinta

Maalgelinta waxaa lo bixiyay min dhibcaha ugu sarreeya ilaa ugu hooseeya, ilaa dhammaan maalgelinta la heli karo la qoondeeyay. Guud ahaan, 34 mashruuc ayaa la maalgeliyey. Kuwaas waxaa ka mid ah: Bixiyeyaal shati haysta ama shahado haysta (22 guri qoys oo shati haysta, 5 xarumood oo xanaano caruur ah), 2 mashruuc oo ka socda qoyska, saaxiibka, iyo daryeelayaasha deriska, 2 mashruuc oo ECEAP-Only Sites ah, iyo 3 mashruuc oo ka socda kooxaha ciyaarta iyo Waxbarash.

## Talaabooyinka Xiga

Iyada oo qayb ka ah ballan-qaadka DCYF ee hannaanka Naqshadeynta Xoriyadda, DCYF waxay u qaban doontaa kulammo jawaab celin ah daneeyayaasha iyo bixiyeyaasha Janaayo, 2023. Waxaan rajeyneynaa inaan ku darno jawaab celinta wareega xiga ee Deeqaha Sinnaanta Carruurnimada Hore, kaas oo diyaar u noqon doona in la codsado dabayaaqada jiilaalka, 2023.